# Lambarkaaga iyo Kaarka Social Security

Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Sidee ayaan ku helayaa lambarka SSN iyo kaarka? | 2 |
| Lacag intee le'eg ayaa kubaxaaya? | 2 |
| Ma jiraan noocyada kaladuwan ee kaararka? | 2 |
| Sidee ayaan cunugayga ugu heli karaa SSN? | 3 |
| Ka waran haddii magacaygu isbadello? | 3 |
| Sidee ayaan ku xaqiijin karaa in diiwaanadeydu yihiin kuwo sax ah? | 4 |
| Ka waran haddii aqoonsigayga soo galootiga ama muwaadinimadu isbadelo? | 4 |
| Ka waran haddii kaarkaygu lumo ama la xado? | 4 |
| Sidee ayaan ku difaaci karaa kaarkayga SSN? | 5 |
| Inaad nala soo Xiriirtid | 5 |


Waxaad u baahan tahay lambarka Social Security (Sooshiyaal Sikuurati) (SSN) si aad u shaqeyso. Waxaan u adeegsanaa SSN kaaga si aan u diiwaan gelino lacagaha ku soo gala aana u go'aamino u qalmidaada gunnooyinka Social Security (Sooshiyaal Sikuutari) iyo adeegyada qaar ee dawlada. Xarumo badan oo dhaqaale, sida bangida iyo shirkadaha daymaha, ayaa sidoo kale codsanaaya lambarkaaga marka aad furanayso akoon.

Haddii aad tahay qof aan ahayn muwaadin oo ku nool mareykanka, waxaad sidoo kale u baahan tahay SSN. Si aad u hesho xog dheeraad ah, eeg *Social Security (Amniga Sooshalka) Lambarada kuwa aan Muwaadiniinta ahayn* (Lambarka Daabacaada 05-10096). Haddii aad shaqo ku meel gaar ah u joogto Mareykanka, eeg *Foreign Workers and Social Security Numbers (Publication No. 05-10107)* (*Shaqaalaha Shisheeye iyo Lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga* (Daabacaada Lambar 05-10107).

## Sidee ayaan ku helayaa lambarka SSN iyo kaarka?

Si aad u codsato SSN iyo kaarka, booqo boggeena Social Security Number and Card (Lambarka iyo Kaarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga) oo ah ***www.ssa.gov/ssnumber*** (keliya waxaa lagu heli karaa af Ingiriis). Boggaan, waxaad ka jawaabi doontaa taxaneyaasha su'aalaha si loo go'aansho inaad awoodo inaad:

- Hawsha codsiga ku samee oonleenka.
- Ku biloow hawsha codsiga oonlaynka, kadibna keen dukumiintiyo kasta oo lagaa codsaday xafiiska deegaankaaga si loo dhamaystiro codsiga, caadiyan muddo kayar intaas.
- Dhameystir hawsha buuxda ee codsiga ee xafiiskaaga maxaliga ah.

Haddii aadan codsiga oonlayn ku buuxin karin, waa inaad booqataa xafiiska **Social Security** (Sooshiyaal Sikuurati). Waa inaad na tustaa dukumiintiyada asalka ah ama nuqullada ay xaqiijisay wakaalada soo saartay kuwaasoo cadeynaaya aqoonsiga, da'da, iyo muwaanimada/xaalada socdaalka. Ma aqbali karno footo koobiyo ama nuqulada nootaayaysan.

**Si aad u ogaato noocyada dukumiintiyada aad u baahan tahay**, booqo ***www.ssa.gov/ssnumber/ss5doc.htm*** (keliya waxaa lagu heli karaa af Ingiriis). (oo kaliya kuqoran afka Ingiriisiga). Marka aad buuxiso codsigaaga (oonlayn ama si waraaq ah), waxaan kuugu soo diri doonaa kaarkaaga boostada ciwaanka aad ku sheegtay codsiga. Waa inaad hesho kaarkaaga 7-10 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood.

Waxaan ka dooneynaa wareysiga tooska ah qof kasta oo jira 12 ama ka wayn oo codsanaaya SSN orijinaal ah, xataa haddii waalidka ama masuulka ilmuhu saxiixo codsiga asagoo ilmaha wakiil ka ah.

## Lacag intee le'eg ayaa kubaxaaya?

Ma jiro qarash kaaga baxaaya helista SSN ama kaarka. Hadddii uu kaa rabo inaad lacag ku bixisid sidaad u heshid kaarka ama lambarka, fadlan xasuuso in adeegyada Social Security ay yihiin bilaash. Waxaad u soo sheegi kartaa qof kasta doonaaya inuu lacag kaa dalbado xafiiskeena Office of the Inspector General (Xafiiska Kormeeraha Guud) barta ***https://oig.ssa.gov*** (Oo kaliya kuqoran afka Ingiriisiga).

## Ma jiraan noocyada kaladuwan ee kaararka?

Waxaan bixinaa 3 nooc oo ah kaararka Social Security (Sooshiyaal Sikuurati). Dhammaan kaararka waxaa ku qoran magacaaga iyo lambarkaaga SSN.

- Nooca 1aad ee kaarku wuxuu muujinayaa magacaaga iyo lambarka SSN. Dadka haysta kaarka noocaan ah ayaa shaqeyn kara bilaa xadidaad. Waxaan siinaa:
  — Muwaadiniinta Mareykanka.
  — Dadka haysta aqoonsiga Daganaanshaha Rasmiga ah ee Sharciga ah.
- Nooca 2aad ee kaarka ayaa muujinaaya magacaaga iyo lambarka qoraal dhahaaya, "VALID FOR WORK ONLY WITH DHS AUTHORIZATION" (KELIYA WAXAA LOO ISTICMAALI KARAA SHAQO MARKA AY DHS ANSIXISO). Waxaan siinaa kaarka noocaan ah dadka sharciyada ku jooga Mareykanka sifo ku meel gaar ah kuwaasoo haysta ogolaanshaha shaqada ee Department of Homeland Security (Waaxda Aamaanka Gudaha) (DHS).
- Nooca 3aad ee kaarka ayaa muujinaaya magacaaga iyo lambarka iyo qoraal dhahaaya, "NOT VALID FOR EMPLOYMENT" (UMA QALMO INUU

DALKA KA SHAQEEYO). Waxaan siinaa kaarka dadka ka yimaada wadamada kale ee buuxiya mid kamid ah shuruudaha soo socda:

— Sifo sharci ayay ku joogaan mareykanka bilaa oggolaansho shaqo oo ay ka helaan DHS, laakiin waxay leeyihiin sabab aan shaqada qusayn oo sharci ah oo ay ugu baahan yihiin SSN.

— Waxay u baahan yihiin SSN waayo sharciga federaalka ayaa qasab ka dhigaaya SSN si qofku u helo gunno ama adeeg.

## Sidee ayaan cunugayga ugu heli karaa SSN?

Waa fikir wanaagsan inaad lambarka codsato marka cunugaagu dhasho. Waxaad u codsan kartaa SSN cunugaaga marka aad codsanayso shahaadada dhalashada cunugaaga. Wakaalada gobalka ee bixisa shahaadooyinka dhalashada ayaa xogta cunugaaga noosoo gudbin doonta. Waxaan diyaarinaynaa SSN waxaana boostada kuugu soo diraynaa kaarka Social Security (Sooshiyaal Sikuurati).

Ama waad sugi kartaa waxaadna ka codsan kartaa xafiis kasta oo Social Security (Sooshiyaal Sikuurati) kamid ah. Haddii aad sugto, waa inaad keenta cadeynta da'da, aqoonsiga, iyo xaalada muwaadinimada Mareykanka. Waa inaad noo keentaa cadeynta xiriirka kaala dhexeeya, ama masuuliyada kaa saaraan ilmaha. Sidoo kale waa inaad noo keentaa cadeynta aqoonsigaaga. Waa inaad xaqiijisaa diiwaanka dhalashada ee cunugaaga, kaasoo qaadanaaya ilaa 12 asbuuc ilaa laga soo saaro. Si aan u xaqiijino diiwaanka dhalashada, waxaan la xiriiraynaa xafiiska sameeyay.

Ilmaha aad korsatay ee aadan dhalin, waxaan ku siin karnaa lambarka ilmaha kahor inta aan masuuliyada waalidnimo lagu siin, laakiin waa inaad sugtaa. Si aad, lambarka cunugaaga ugu codsatid magaciisa cusub. Haddii aad rabtid cunugaaga inaad ku heshid ujeedooyin canshuureed isla inta la korinaato, la xariir Adeega Dakhliga Guddaha ee *Foomka W-7A, Application for Taxpayer Identification Number for Pending U.S. Adoptions* (W-7A, *Codsiga Lambarka Aqoonsiga Canshuur bixiyaasha ee loogu talagalay Caruurta la Korsado ee Maraykanka*) . Si aad u hesho xog dheeraad ah, eeg *Social Security Numbers for Children* (Publication No. 05-10023) (*Lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga ee Carruurta* (Daabacaada Lambar 05-10023).

## Ka waran haddii magacaygu isbadello?

Haddii aad sifo sharci ah u badesho magacaaga sabab la xiriirta guur, furiin, amar maxkamadeed, ama sabab kasta oo kale, waa inaad noosoo sheegtaa si aan kuu siino kaarka saxda ah. Haddii aad shaqeyso, sidoo kale u sheeg cida aad u shaqeyso. Si aad u biloowdo badelida magaca, waxaad raaci kartaa talaabooyinka ku qoran ***www.ssa.gov/ssnumber*** (oo keliya ku qoran af Ingiriis).

Haddii aadan noo sheegin marka magacaagu isbadello, waxay:

- Dib u dhac ku ridaysaa lacagtaada canshuur celinta.
- Waxay ka hor istaagaysaa mushaarkaaga in si sax ah loogu qoro diiwaankaaga Social Security (Sooshiyaal Sikuurati), taasoo hoos u dhigaysa cadadka aad helayso mustaqbalka ee gunnooyinkaaga Social Security (Sooshiyaal Sikuurati).

Haddii aad u baahan tahay inaad badesho magacaaga iyo kaarkaaga Social Security (Sooshiyaal Sikuurati), waa inaad noo keento dukumiinti cadeynaaya isbadelka magacaaga sharciga ah. Dukumiintiyada loo qaadan karo cadeynta isbadelka magacaaga sharciga ah waxaa kamid ah:

- Dukumiintiga guurka.
- Amarka furiinka.
- Shahaadada Guurka Muwaadin Wadanka u dhashay oo muujinaysa magac cusub.
- Amarrada Maxkamadda ee badelka magaca.

Haddii dukumiintiga aad cadeyn ahaan ugu keento isbadelka magaca sharciga ah uusan na siin xog ku filan inaan ku aqoonsano diiwaanadaada, ama haddii aad magacaaga badeshay wax ka badan 2 sano kahor (4 sano kahor haddii aad ka yar tahay 18 sano), waa inaad noo keentaa dukumiintiga aqoonsiga ee magacaagii hore (sida ku qoran diiwaanadeena). Waxaan aqbali doonaa dukumiintiga aqoonsiga ee magacaagii hore ee dhacay.

Haddii aadan haysan dukumiinti aqoonsi oo magacaagii hore ku qoran yahay, waxaan aqbali karnaa aqoonsiga aan dhicin ee magacaaga cusub ku qoran yahay. Waan samayn karnaa arintaan ilaa inta aan si sax ah u cadeyn karno aqoonsigaaga ku jira diiwanadeena.

Kaarkaaga waxaa ku qornaan doona isla lambarka ku qornaa kaarkaagii hore laakiin wuxuu muujinayaa magacaaga cusub.

## Sidee ayaan ku xaqiijin karaa in diiwaanadeydu yihiin kuwo sax ah?

Sanad kasta shirkada aad u shaqeyso ayaa noosoo dirta nuqulka Foomkaaga W-2 (Wage and Tax Statement) (Diiwaanka Mushaarka iyo Canshuurta). Waxaan isku eegaynaa magacaaga iyo SSN ku qoran Foomka W-2 xogtaada ku jirta diiwaannadeena. Waxaan ku darnaa mushaaraadka ku qoran Foomka W-2 diiwaankaaga mushaaraadka ee Social Security (Sooshiyaal Sikuurati).

Waa muhiim in magacaaga iyo SSN ku qoran kaarkaaga Social Security (Sooshiyaal Sikuurati) ay waafaqaan diiwaannada mushaarka ee shirkada aad u shaqayso iyo Foomka W-2. Tani waxay noo sahlaysaa inaan lacagaha aad heshay ku qorno diiwaankaaga. Waa shaqo adiga kuu taala xaqiijinta in diiwaanadaada Social Security (Sooshiyaal Sikuurati) iyo diiwaannada shirkada aad u shaqayso ay isleeyihiin. Haddii magacaaga ama lambarka ku qoran kaarka Social Security (Sooshiyaal Sikuurati) uu khalad yahay, la xiriir mid kamid ah xafiisyada Social Security (Sooshiyaal Sikuurati) si isbadello loo sameeyo. Hubi Foomkaaga W-2 si aad u xaqiijiso in diiwaanka shirkada aad u shaqayso sax yahay iyo, haddii uusan sax ahayn, sii shirkada aad u shaqayso xogta saxda ah.

Waxaad ka eegi kartaa diiwaankaaga mushaaraadka ciwaankaaga gaarka ah ee *my* Social Security (Sooshiyaal Sikuuratigayga). Si aad u aragto mushaaraadkaaga, booqo ***www.ssa.gov/myaccount*** (keliya ku qoran Ingiriis) kadibna ciwaan ka samayso.

## Ka waran haddii aqoonsigayga soo galootiga ama muwaadinimadu isbadelo?

Haddii aqoonsigaaga socdaalku isbadello ama aad noqoto muwaadin Maraykan ah, waa inaad noo sheegtaa si aan wax uga badelno diiwanadaada. Si xogtaada aqoonsiga socdaalka ama muwaadnimada looga saxo diiwanaadeena, waa inaad keentaa dukumiintiyada cadeynaaya aqoonsigaaga ama muwaadnimadaada cusub. Waxaan kaliya aqbali karnaa dukumiintiyo gaar ah si aan u xaqiijino muwaadinimada si aad u hesho kaararka cusub ama badelka ah. Dukumiintiyada waxaa kamid ah baasaboorka Maraykanka, Shahaadada Jinsiyada, ama Shahaadada Muwaadinimada. Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah, Social Security ayaa codsan doonta inaad u keento dukumiintigaaga hadda ee socdaalka.

## Ka waran haddii kaarkaygu lumo ama la xado?

Waad badeli kartaa kaarkaaga ama kaarka cunugaaga ee Social Security (Sooshiyaal Sikuurati) si bilaash ah haddii uu kaa lumo ama lagaa xado. Hase yeeshee, dadka kaararka haysta ayaa heli kara keliya 3 kaar oo badel ah sanadkii iyo 10 kaar oo badel ah inta ay nool yihiin. Badalida magacyada sharciga ah iyo arimaha kale ee furan kuma jiraan xadidaadahaas. Tusaale ahaan, isbadalada ku dhaca xaaladaada muwaadinimo kuwaasoo ubahan in kaarka wax laga badalo kuma

jiri karaan xadidaadahaan. Sidoo kale, wax dhiibaato ah kaagama imaanayso haddii aad cadayn karto inaad kaarka ugu baahantahay si aad uga hortagto caqabad wayn oo muuqata.

Si aad u hesho badelka kaarka Social Security (Sooshiyaal Sikuurati), waa inaad noo keentaa dukumiintiyo muujinaaya aqoonsigaaga. Waa inaad sidoo kale noo keentaa dukumiintiyada muujinaaya da'daadada iyo muwaadinimada Mareykanka, haddii aysan horey ugu jirin diiwaanadeena.

Kaarkaaga badelka ah ayaa lagu qori doonaa isla magaca iyo lambarka ku qornaa isla kaarkaagii hore.

Si aad u hesho badelka kaarkaaga Social Security (Sooshiyaal Sikuurati), waa inaad raacdaa tallaabooyinka ku qoran ***www.ssa.gov/ssnumber*** (keliya ku qoran Ingriisi).

## Sidee ayaan ku difaaci karaa kaarkayga SSN?

Waa inaad qarsataa xogtaada lambarka SSN aadna iska ilaalisaa inaad u bixiso sifo khaldan. Waa inaad gashataa kaarkaaga Social Security (Sooshiyaal Sikuurati) meel amaan ah oo aad la gelinayso dukumiintiga kale ee muhiimka ah. Haqaadanin ilaa inaad tusayso maahee qof aad ushaqayso ama adeeg bixiye.

Waxaan samaynaa waxyaabo kaladuwan si aan uga difaacno lambarkaaga in si khaldan loo isticmaalo. Tusaale ahaan, waxaan qasab ka dhigi karnaa aana si taxadar leh ula soconaynaa caddeynta aqoonsiga ee cadadka codsada in loo badelo kaarka ka lumay ama laga xaday ee Social Security (Sooshiyaal Sikuurati) ama aad codsato in laguu saxo kaarka. Hal sabab oo aan arintaan u samayno waa inaan dadka ka ilaalino inay sifo khiyaano ah ku qaataan kaara SSN si ay u helaan aqoonsiyo been ah.

Waxaan ilaalinaa sirta diiwaannada Social Security (Sooshiyaal Sikuurati) ilaa in:

- Sharcigu naga doonaaya inaan xogta siino wakaalad kale oo dawladeed.
- Xogtaada loogu baahan yahay si loo fuliyo shaqada Social Security (Sooshiyaal Sikuurati) ama barnaamij kale oo caafimaadka ama faya dhawrka quseeya oo dawladeed.

Waa inaad aad uga taxadartaa faafinta lambarkaaga iyo kaarkaaga si aad uga ilaaliso in si khaldan loo isticmaalo lambarkaaga. Keenista lambarkaagu qasab maaha xataa marka toos lagaaga codsado lambarkaaga.

Haddii lagaa codsado, waa inaad waydiisaa:

- Maxaa laga rabaa lambarkaaga?
- Sidee ayay u isticmaalayaan lambarkaaga?
- Maxaa dhacaaya haddii aad diido?
- Sharcigee qasab ka dhigaaya inaad siiso lambarkaaga?

Jawaabaha su'aalahaan ayaa kaa caawin kara inaad go'aansato haddii aad doonayso inaad bixiso nambarkaaga SSN. Haddii aadan hubin, ha siin lambarkaaga SSN ilaa inaad xaqiijiso maahee sababta loogu baahan yahay.

## Inaad nala soo Xiriirtid

Waxaa jiro dhoor qaabab aad nagula soo xiriirtid, sida onleenka, taleefon ahaan, iyo qof ahaan. Waxaan halkaan u joognaa inaan kaaga jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. Wixii ka badan 85 sanno jir, Social Security (Amniga Bulshada) ayaa gacan ka geystay illaalinta maanta iyo bari iyagoo siinayo macaash iyo illaalo dhaqaale malaayiin dad ah oo loo marayo safarka noloshooda.

### Booqo websaydkeena

Qaabka ugu haboon ee loo sameeyo ganacsiga Social Security (Amniga Bulshada) waa onleenka ee ***www.ssa.gov*** (waxaa lagu heli karaa af Ingiriis iyo Isbaanish). Waxaad gaari kartaa wax badan. Qaar ka mid ah adeegyadaan waxaa lagu helayaa kaliya af Ingiriis. Si aan kaaga caawino sameynta ganacsiga Social Security (Amniga Bulshada),

- Ka codso Extra Help with Medicare prescription drug plan costs (Caawin Dheeri ah oo qarashaadka qorshaha daawada qorista Medicare) (waxaa lagu helayaa kaliya af Ingiriis).
- Codso noocyada ugu badan ee macaashka (waxaa lagu helayaa kaliya af Ingiriis).
- Hel koobiyada daabacaadaheena (waxaa lagu helayaa luuqado kala duwan).
- Ka hel jawaabo su'aalaha inta badan la isweydiiyo (waxaa lagu helayaa af Ingiriis iyo Isbaanish).

Markii aad abuurtid gaar ah oo *my* Social Security akoon (waxaa lagu helayaa kaliya af Ingiriis), waxaad sameyn kartaa xitaa wax badan.

- Dib u eeg *Social Security Statement* (Bayaankaaga Amniga Bulshada).
- Xaqiiji daqliyadaada.
- Hel qiyaasaha macaashka mustaqbalka.
- Daabac warqada xaqiijinta macaashka.
- Badel warbixintaada dabaajiga tooska ah.
- Codso badelka Medicare (Daryeelka-caafimaadka) kaarka.
- Hel badelka SSA-1099/1042S.
- Codso badelka Social Security (Amniga Bulshada) kaarka, haddii aadan qabin wax badelo ah oo gobolkaaga ka qeybqaato.

Gelitaanka akoonkaaga gaarka ah *my* Social Security waxaa laga yaabaa inuu ka xadidanyahay isticmaalayaasha ka baxsan Mareykanka.

## Na soo wac

Haddii aadan isticmaali karin adeegyadeenna onleenka, waan kugu caawin karnaa taleefon ahaan markii aad soo wacdid xafiiska deegaankaaga ee Social Security (Amniga Bulshada) ama Lambarka Taleefonkeena bilaashka ee Qaranka 800. Waxaan bixinaa adeegyada turjubaanka oo bilaash ah markii la codsado. Waxaad ku heli kartaa warbixinta xafiiska deegaankaaga adigoo gelinayo furaha ZIP-kaaga websaydkeena raadiyaha xafiiska (inkastoo raadiyaha xafiiska deegaanka kaliya lagu helayo af Ingiriis, waad gelin kartaa furaha zip-kaaga si aad u heshid xafiiska deegaanka kuu dhow).

Waxaad naga soo wici kartaa **1-800-772-1213** — ama lambarkeena TTY ee, **1-800-325-0778**, haddi aad dhagool tahay ama uu kugu adagyahay maqalka — inta u dhaxeyso 8:00 a.m. – 7:00 p.m., Isniinta illaa Jimcaha. **Waqtiyada sugitaanka ee lala hadlo wakiilka Social Security** (Amniga Bulshada) **ayaa caadi ahaan ka gaaban Ar-bacooyinka illaa Jimcooyinka ama xili dambe maalinta**. Wixii adeegyada turjumaada bilaashka ah, ku jir qadka oo aamusnow inta lagu jiro cajalada tooska ah ee codka af Ingiriiska, illaa wakiilka Social Security (Amniga Bulshada) ka jawaabo. Wakiilka Social Security (Amniga Bulshada) ayaa la xiriirayo turjubaan kaa caawiyo wacitaankaaga.

Waxaan sidoo kale ku bixinaa adeegyo badan oo taleefonka tooska ah af Ingiriis iyo Isbaanish, oo la helo 24 saac maalinkii, marka uma baahnid inaad la hadashid wakiilka Social Security (Amniga Bulshada).

Haddii aad haysatid dokumentiyo aan u baahannahay inaan aragno, xasuuso inay orijinaal ahaadaan ama koobiyo ay cadeeyeen hay'ada soo saartay.

Securing today and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-10002-SO | January 2023 (Recycle prior editions)
Lambarkaaga iyo Kaarka Social Security
Your Social Security Number and Card (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray laguna daabacay Lacagta Canshuurta Maraykanka